# Weydiinta UK ee Covid-19
# Jawaabaha kooban – ee la Tashadka Tixraaca Shuruudaha qabyada ah
# Maajo 2022

## Gogoldhig

Waxaa la ii magacabay bishii Disembbar 2021 Guddomiyaha Weydiinta UK ee Covid-19. Waa shaqadeyda inaan hubiyo in Weydiinta ay si wanaagsan u buuxin karto ujeedadeedu - si loo baaro u diyaargarowga iyo ka jawaabista cudurka safmarka ah ee Covid-19, iyo si loo barato casharada loogu talogalay mustaqbalka.

Baaxada waxaa Weydiintu ay eegi doonto ayaa lagu sharrxi doonaa Tixraaceeda Shuruudaha. Gaaristood ballaran ayaa siinaya Weydiinta xoriyadd lagu baaro fikradaha kala duwan ee jawaabta UK ee cudurka Safmarka ah. Kadib markii aan ka helay bishii Marso Ra'iisal wasaraha Tixraaca Shuruudaha, mudnaanteyda waxay aheyd in la qabto la tashad dadweyne si loo xaqiijiyo inay shaqadeydu inta badan ay ka turjumi karto walacyada dadweynaha.

Dukumentigan wuxuu sharraxya falanqaynta madaxa banaan ee Weydiintu ee la tashadka dadweynaha. Iyada oo lagu saleynayo awoodda dareen ee dadweynaha, waxaan soo jeedinaya Tixraaca Shuruudaha in la ballariyo oo dib loo habeeyo.

Waxaa ii sharaf ahayd inaan kula kulmo qoysaska ay tacsiyadu ku dhacday kow iyo toban magaalo oo UK dhan ah, kuwaas oo la wadaagay waayo aragnimadooda waayista mid ka mid ah ehelkooda intii lagu jiray cudurka safmarka. Waxaan sidoo kale ka helnay 20,000 oo jawaabood la tashadka dadweynaha. Ma awoodi laheyn inaan ku taliyo sida, cadeynta, isbeddeladda gaarka ah ee Tixraaca Shuruudaha iyada oo ay dadku wadaagin fikradaha wax ku oolka ah.

Ra'iisal Warasaaraha ayaa hadda tixgelin doona tallooyinkeyga waxaana rajaynaya inaan u helo sida ugu dhaqsiyaha badan Tixraaca Shuruudaha kamadambaysta ah, sidaa darteed Weydiintu ayaa bilaabi karto shaqadeeda si dhab.

Waxaan jaclaan lahaa inaan dib ugu xaqiijiyo ballanta aan ku qaaday kuulmada aan la yeeshay qoysaska laga dhintay. Dadka ay dhibaatada ugu ay soo gaartay intii lagu jiray cudurka safmarka ah inay noqon doonaan bartamaha qalbiga shaqada Weydiinta. Waxaan iga go'aan inaan xaqiijiyoo Warasashadu inuu helayo qof walba oo degan UK, waxayna baari doonaa saameynta ay ugu yeelatay dhan walba bulshada UK.

Waxaan ballan qaadaya in Weydiintu ay Dowladda u qabto si madaxbanaan, oo ay hagto maba'iidada cadaaladda iyo furnaanta.

Baroness Heather Hallett

## *Hordhac*

Weydiinta UK ee Covid-19 ayaa la sameeyey si loo baaro u diyaargarowga iyo ka jawaabista cudurka safmarka ah ee Covid-19, iyo si loo barto casharada loogu talogalay mustaqbalka.

Baroness Hallett, garsoorihii hore ee maxkamadda racfaanka, ayaa loo magacaabay gudoomiyaha Weydiinta bishii Diseembar 2021. Waxay hogaamin doontaa Weydiinta waxayna, tan iyo markaas, dhisaysay kooxda Weydiinta si ay u taageeraan iyada.

Weydiintaan waxay ka duwan tahay wixii ahaa weydiimihii kale ee hore ee sharciga UK. Ma eegayso hal dhacdo ama dhacdooyin taxane ah, ama sababta ama waxaa ay u dhaceen. Taasi beddelkeeda, waxay baari doonaa sida cudurka safmarka ugu dhuftay wadanka oo dhan (xaqiidii, afar wadan), sida Dowladda UK, ay u wareejisay maamuladda iyo qeybo badan oo kale ee dowladda ay uga jawaabayn, ku dhawaad gabi ahaan farqiga u dhaxeya go'aan-gaarista iyo dabeecadaha dadweynaha.

Iyada oo aan horey loo arkin baaxada surtagalnimadan, Weydiintu waxay u baahan tahay inay noqon mid cadeyso surtagalnimada wax ku saabsan waxaa aan fiirin doono, iyo sidaa aan u sameeyn doono markaas. Tani waxay sharrxi doontaa, heerka sare, 'Tixraaca Shuruudaheena', taas oo bixin doontaa qaabka guud iyo xadida mowduucyada la baarayo. Ra'iisal Wasaaraha ayaa masuul ka ah dejinta Shuruudaha Tixraaca.

Wixii ah eegista mowduuca ballaran ee Weydiinta sida cudurka safmarka Covid-19, ma ahaan wax lagu taaban karo Tixraaca Shuruudaha si loo dejiyo liiska dhammeystiran ee arrin walba ee oo wax la qaban doono. Surtagal ma noqon doonto in la aqoonsado wax walba oo aan u baahanahay inaan ku baarno heerka hore ee shaqadeena, waxaan u baahan doonaa inaan celino dabacsanaanta si aan u baarno arrimaha cusub inta laga aqoonsanayno cadeynta la ururinay.

Sidaa darteed Tixraaca Shuruudaha ayaa sharxaysa mowduucyada ballaran ee taxanaha ah, kadib kuwaas oo aan ka soo saari doono liiska faafaahsan ee arrimaha iyo baaritaanada inta ay socoto Weydiintu. Arrinta ma u baahna in si cad ugu faafaahino Tixraaca Shuruudaha si ay noogu sahasho inaan baarno, ilaa inta ay ku haboon tahay mid ka mid ah mowduucyadan ballaran.

## Sidee loo go'aamiyey Tixraaca Shuruudaha?

Tixraaca Shuruudaha qabyad ah ee loogu talagalay Weydiinta UK ee Covid-19 waxaa dejiyey Ra'iisal Wasaraha, kadib markii in muddo ah u la tashanaayay

Baroness Hallett iyo Ku wareejinta Maamuladda Scotland, Wales iyo Northern Ireland, waxaana la daabacay 9 Maarso 2022. Ra'iisal Wasaraha wuxuu weydiiyey Baroness Halle inay qabto la tashadka Dadweynaha ee Tixraaca Shuruudaha, si ay dadweynahu u awooddaan inay saameyaan ugu yeeshan arrimaha lagu tixgelin lahaa Weydiintu.

Laga bilaabo 11 Maarso ilaa 7 Apriil 2022, waxaan qabanay la tashadka furan si aan u weydiino fikradaha ah waxaa Xog ururintu tahay in lagu baarayo iyo sida aan u qabanayno shaqadeena. La tashadkaan wuxuu u furnaa qof walba, dadweynhana waxay taladooda ku tabaruc kareen websaydkeena, iyaga oo iimayl ahaan noogu soo diri karay ama waxay noo soo qora warqad. Waxay ka koobnayd afar su'aal:

1. Tixraaca Shuruudaha qabyo Weydiinta ma daboolayaan dhammaan meelaha aad u maleeynayso inay wax ka qabto Weydiinta? Iyo haddii ay aheyn, fadlan sharax sababta.

2. Arrimahee ama mowduucyadee ayaad u maleeysaa inay Weydiintu fiiriso marka ugu horeyso?

3. Ma u maleeysaneysa Weydiintu inay jedineyso taariikh-dhammaadka qorsheysan ee loogu talagalay dhageysiyadda dadweynaha, si ay ugu caawiso xaqiijinta waqtiga degdeg ah ee natiijooyinka iyo talooyinka?

4. Sidee loo naqshadeynaya Weydiintu oo na looga shaqeynaya in loo hubiyo dadka laga dhintay ama kuwa ay waxyeelada soo gaartay ama dhibaatada uu sababay cudurka safmarka ah in la maqlo codadkooda?

Maadama ay ka qeyb tahay hab-sami socodka la tashigaan, Baroness Hallett ayaa la kulantay qoysaska laga dhintay ee magaalooyinka UK si ay u dhageysto aragtiyadooda Shuruudaha Tixraaca qabyada ah.

Iyada oo ay barbar socto, kooxda Weydiintu waxay kula kulmeen wakiilada 'miiska wada hadalka' in ka badan 140 urur, waxayna soo koobayn mowduucyada sida sinaanta iyo kala duwnaanta, daryeelka caafimaadka, ganacsiga, waxbarashada iyo dadka dhalinyarada ah, iyo waxyaabo kale. Qoraaladda miiska wada hadalka ee munaasabad walba ayaa laga helaya websaydkeena.

Wadar ahaan waxaan helnay 20,061 jawaabood oo ah la tashadka, 19,903 ka mid ah waxaa naloo soo mariyay foomka la tashadka ee onine-ka ah. Waxaan u xilsaarnay Alma Economics, oo ah la talin cilmi baaris oo madax banaan, si ay falanqeyso jawaabaha oo ay u saarro warbixin madax banaan oo la fahmi karo, oo soo koobaya fikaradaha ka jawaabayaasha iyo mowduucyada muhiimka ee ka soo baxay hab socodka la talinta. Warbixintaas waxaa si gaar ah looga heli karaa websaydkeena.

Baroness Hallett waxay tixgelisay dhammaan cadeymaha la helay intii lagu mudada la tashadka iyo waxayna ku soo gabagabaysay in isbeddelo looga baahan yahay Tixraaca Shuruudaha si looga jawaabayo arrimaha taagan. Dukumentigaan wuxuu tixgelinaya mowduucyada muhiimka ah ee la aqoonsaday wuxuuna sharraxaya isbeddelada lagu taliyey Tixraaca Shuruudaha ee qabyada ah ee Ra'iisal Wasarahu u sameeysay Ra'iisal Wasaraha. Xoog saaristeenaa ku jirta soo koobida dukumentigan waa fikradaha aan helnay ee ku saabsan Shuruudaha Tixraaca naftooda, su'aasha 1 ee la tashadka. Fikradaha aan ka maqalanay su'aalah 2, 3 iyo 4 ayaa ogeysiin doonaa fikrada Baroness Hallett ee ah sida ay u shaqeyn doonto Weydiintu marka la dhammeystiro Tixraaca Shuruudaha.

## Falanqaynta la talinta iyo soo koobida natiijooyinka

Qeybtaan waxay sahminbaysa arrimaha muhiimka ah kuwaas oo ay sheegeen ka jawaabayaasha ee la xiriira Tixraaca Shuruudaha. Kuwani waxaa lagu aqoonsaday falanqaynta cadeynta aan helnay, waxaa si madax banaan u qabtay Alma Economics.

Xaaladdha qaarkooda, ka jawaabayaasha ayaa soo hadal qaaday su'aalaha ku saabsan faafaahinta jawaabta dhinacyada durba waxaa daboolay Tixraaca Shuruudaha qabyada, xitaa arrimaha faafaahsan haddii aan si cad loo sheegin. Xaaladdaha kale, ka jawaabayaasha ayaa sidoo kale soo hadal qaaday arrimaha aysan daboolin waxa Tixraaca Shuruudaha qaybada ah, ama Tixraaca Shuruudaha laga beddeli karo si loo sii waadixiyo ku daristooda.

## Su'aasha 1 ShuruudahaTixraaca qabyo Weydiinta ma daboolayaan dhammaan meelaha aad u maleeynayso inay dabooshay Weydiintu?

### Saameynta cudurka safmarka ah ee carruurta iyo dadka dhalinyarada ah

Mowduuca inta badan si cad xooga loo saaray intii lagu jiray la tashadka Weydiintu ay wax ka qabtay gaar ahaan saameynta cudurka safmarka ah ee carruurta iyo dadka dhalinyarada ah. Ka jawaabayaasha ayaa soo jeediyey in carruurta loo saameyey si ka duwan dadka waaweyn, oo leh halis ka yar caafimaadka jirka ee caabuqa Covid-19, laakiin dhowr halis oo ku ah horumarka mudada-dheer ee jirkooda, dareenkooda iyo bulsheed.

Tixraaca Shuruudaha Qabyada ah waxaa lagu daray bixinta Weydiintu si loo baaro saameynta cudurka safmarka ah ee xiriira '*xayiraadaha xaadirista goobaha waxbarashada*'. In kasto tani ay u oggolaan laheyd baarista arrimaha ka imaanaya qulqulka Xayiraadaha — sida bixinta cuntada bilaashaka ah ee dugsiga, saameynta sinaan la'aanta ee helida khadka iyo laptop-yada, ama saameynta kooxaha imtixaanka — sidoo kale way cadahay Weydiintu inay rabto inay awoodo in baarto kala duwnaanshaha ballaran ee ka baxsan saameynada waxbarashada.

Waxaan maqalnay hab socodka la tashadka ee ku saabsan arrimaha saameyna carruurta iyo dadka dhalinyarada inay ka mid yihiin:

- **Goobaha sanadaha hore** — ka jawaabayaasha waxay weydiiyeen Shuruudaha Tixraaca inay noqoto mid aad u cadeysa oo ay ku jirto goobaha

sanadaha hore, gaar ahaan walacyada ku saabsan saameynta xayiraadahan ku lahaa adeegyada hormarinta bulshada ee carruurta yaryar.

- **Ilaalinta ilmaha, ilaalinta badqabka adeegyada iyo carruurta ku jirta daryeelka** — walacyada ku saabsan ilaalinta cunuga iyo ilaalinta qabka ayaa si joogto ah loo sheegay, oo leh jawaabo badan oo loo tixraacayo hoos u dhaca muuqda ee ku yimid carruurta nuqul inta adeegyada sida dusgiyada, GPs-yada iyo xarumaha carruurta ayaa hoos u dhacay ama la xiray, saameyntan waxay ku yeelatay carrrurta dayac iyo xad gudub.

- **Caafimaadka dhimirka iyo fayo qabka** — ka jawaabayaasha waxay qeexeen kororka walaca iyo kalinimada dadka dhalinyaraa ah intii lagu jiro cudurka safmarka ah, iyo waxay su'aal ka keenayn awooda Carruurta iyo Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Dadka qaangaarka ah si loo daboolo baahiyahaas. Ka jawaabayal badan ayaa sidoo kale xusay saameynta xun ee cudurka safarmarka ah uu ku keenay jirka iyo hormarka bulshada, iyada oo la tixraacato xiritaanka goobaha ciyaarta iyo raaxda sida gooroomaha ciyaarta sida xaqiiqda ah.

- **Carruurta ku jirta goobaha ammaaka ah** — ka jawabayaasha waxay aad u rabeen Xog ururintu inay tixgeliso saameynta cudurka safmarka ah ee carruurta ku jirta guryaha ammanka ah sida saameynta xiriir la'aanta shaqsi ahaan loola yeesho waalidiinta. Ka jawaabayaasha ayaa sidoo kale hadal qaaday arrimaha ku saabsan saameynta carruurta ku jirta goobaha gacanta lagu hayo, sida saameynta muddo kordhinta qolalalka xiran, iyo xayiraadda helida waxbarashada.

- **Adeegyada dhalmada iyo dhallaanka** — saameynta uu ku yeeshay cudurka safmarka ah dhallanka ayaa si joogto ah loo xusay, iyada oo ka jawaabayaasha la weydiiyey Xog ururintu inay tixgeliso saamaynta xayiraadaha shakhsi ahaan umulisada dhalmada kadib iyo booqashooyinka caafimaadka iyo saameynta bulshada iyo kobaca jirka ee dhallanka ee isdhexgalka xadidan ee dibadda guriga intii lagu jiray xayiraadda. Ka jaawaabayaasha ayaa sidoo kale walac ka muujiyey saameynta caafimaadka dhimirka ee ku yeeshay waalidiinta waayo aragnimada adag intii uurka lahayeen — sida tagista iskaanyada iyo dhalista iyada aan taageero ka helaynin lamanahooda oo aan xaadir aheyn.

Iyadda oo loo eegayo baaxda culuska fikrada inta lagu jiro la tashadka, Baroness Hallet waxay oggolaatay Shuruudaha Tixraaca wax ka beddelid lagu sameeyo si loogu oggolaado muujinta tixgelinta ballaran ee saameynta carruurta iyo dadka dhalinyarada ah. Sidaa darteed **waxay ku talinaysaa gelinta meelaha soo socda ee gaar ah ee tixgelinta inay noqonto ujeedada koowaad ee Weydiintu, ee ku jirta Shuruudaha Tixraaca:**

- **saameynta ay ku yeelatay *carruurta iyo dadka dhalinyarada ah, oo ay ku jirto caafimaadka, fayo-qabka iyo daryeelka bulshada;***
- ***waxbarashada iyo bixinta sanadaha hore; iyo***
- ***daryeelka dhalmada ka hor iyo kadib.***

Waxaa jiro dhowr tixraac oo gaar ah kuwaas oo aan loo baahnayn in lagu daro Tixraaca Shurudaha (tusaale ahaan carruurta ku jirta hoyiga ammaniga ah), sababtoo ah ku darista la soo jeediyay ayaa siin doontaa Weydiinta awooda sida buuxda loogu baaro arrimaha walaca ee la soo hadal qaaday.

## Maareynta caafimaadka iyo qeybaha daryeelka intii lagu jiray cudurka safmarka ah

Maareynta cudurka safmarka ah ee qeybaha daryeelka iyo caafimaadka waxay si xoogaan xooga u saartay mowduuca ku dhex jira la talinta. Qaar badan oo ka mid ah arrimaha waxaa durbo dabooli doonaa qeybaha Tixraaca Shuruudaha ee la xiriira '*jawaabaha caafimaadka iyo qeybta daryeelka ee UK*' oo dhan — tusaale ahaan aarrimaha la sheegay ee la xiriira bixinta PPE, saameynta bixinta ee daryeelka caafimaadka ee aan aheyn-Covid, iyo ku haboonaanta tallaabooyinka lagu qaado daryeelka guryaha.

### Daryeelka lagu bixiyey dibadda daryeelka guryaha

Jawaababaha la tashadka ayaa si joogto ah loogu xusay qeybta la xiriirta Tixraaca Shuruudaha *' maareynta cudurka safmarka ah ee daryelelka guryaha iyo goobaha kale daryeelka'*ma ahan gaar ahaansho ku filan oo ku saabsan waxaa ay tahay baaxda *'goobaha kale ee daryeelka'.*

Ka jawaaayaasha waxay xuseen in daryeelka ugu badan ay bixiyeen xubanaha qoyska ee aan lacag la siineyn, asaxaabta, ama dariska ay bixiyaan taageerada qofka nugul kaas oo aanu maareyn karin taageeradaas la'aanteed. Qodobkan waxaa si gaar ah xooga loogu saaray kulumada qoysaska laga dhintay. Tirakoobkii 2011 waxaa jirtay 6.5 milyan xanaaneyaal oo aan lacag la siin ee ku nool UK, laakiin tiradaas ayaa la rumeysan yahay inay aad u korortay tan iyo markaas gaar ahaan intii lagu jiray mudada cudurka safmarka ah. Ka jawaabayaashu ayaa weydiiyey in Weydiintu sahmiso saamaynta cudurka safmarka ku yeeshay xanaanayaasha aan lacagta la siin, sidoo kale arrimaha sida helitaankooda PPE.

Baroness Hallett **waxay oggolatay tani noqoto tixraac gaar ah, sidaa darteed waxay ku talin ku talina ku darista ujeedada koowaad ee ku jirta Shuruudaha Tixraaca:**

- ***Daryeelka guriga, oo ay ku jirto xanaaneyaasha aan la siinin lacagta.***

Ka jawaabayaasha kale ee la tashadka ayaa xusay inay dareemayaan inay tixraaca ku cad ah '*goobaha daryeelka kale*' iyo in kale waxaa ku jira adeegyada kale ee daryeelka ee ka baxsan daryeelka guriga ee deegaanka — tusaale ahaan, adeegyada taageeraa nolosha, adeegyada ku saleysan bulshada, iyo daryeelka nasashada. Ka jawaabayaasha waxay dareemayn bayaanka qabyada ah in si cad loogu soo daray aadeegyada daryeelka ee la siiyo dadka waaweyn, laakiin halis geliya waayista adeegyada daryeelka ee la siiyo dadka nugul ee ku shaqaya-dada.

Tixraaca 'goobaha kale ee daryeelka' waxaa loogu talogalay inay si ballaran ugu filnaanto si ay oggolaato baarista goob walba marka laga daro guryaha daryeelka deegaanka. Qorista goob walba oo daryeel surtogala ah ayaa laga yaabaa inay helis geliso in laga tago goobta ay dib ka go'aamin karto Weydiinta ay rajaynayso inay baarto, laakiin sidaa ma sameeyn karto sababtuna eytahay in la liis garayn. Sidaa darteed Baroness Hallett **ma ku talinayso in la beddelo '*goobaha kale ee*' daryeelka.**

Inta lagu jirey la tashadka waxaan sidoo kale maqalanay walacyada ku saabsan in dadka lagu siiyo guryaha daawada daryeelka. Ka jawaabayaasha waxay xuseen in kororka ballaaran ee dhimashada ee ka dhex dhacday guryaha gaarka intii lagu jiry cudurka safmarka ah ey keentay walacyada ah in la joojiyo adeegyo badan intii lagu jiray xayiraadda ayaa ka dhigan inay qaar kamida dadka ay u dhiteen maareyn la'aan xanuun ama daryeelka gaarka ah ee ku filan.

Baarista xad-dhaafka ah ee dhimashada ka dhacday guriga waxaa lagu daboolay baaxdaa Shuruudaha Tixraaca ee qabyada ah, ee xeerka'*cawaaqiibta cudurka safmarka ah ee loogu talagalay xaaladdaha la xiiriirada baahiyaha aan aheyn-COVID*'. Sidaa darteed Baroness Hallett **ma ku talinayso wax ka beddelista Shuruduudaha Tixraaca si ugu turjunto arrintaas.**

**Jawaabta NHS 111 iyo adeegyada 999**

Intii lagu jiray la tashadka waxaan dhagaysanay walacyada ka imaanaya, gaar ahaan dadka laga dhintey, ee ku saabsan awooda adeegyada NHS 111 ee ka jawaabista wicintaada badan ee la soo wacayay, baaritaanka tallada ku haboon ee lagu bixiyey labaduba telefoonka iyo adeegyada online-ka ah 111.

Ka jawaabayaasha ayaa sidoo kale xusay walacyada ku saabsan waqtiga jawaabta ee loogu talo galay adeegyada ambalasta ee xaaladdaha degdeg ah, is waafajin la'aanta muuqata ee habka go'aan qaadashada haddii ama adeegyadad amabalaasta ey geyn karaan qof leh astaamaha Covid isbitaal.

Baroness Hallett **waxay oggolaatay arrimahaan inay ka turjumaan Tixraaca Shuruudaha, waxayna ku talinaysa ku darista qoraalka soo socda ee leh ujeedada koowaad:**

- ***lambarka hore ee leh adeegyada tallada ee daryeelka caafimaadka rasmiga sida 111 iyo 999***

**Goobaha daryeelka aasaasiga ah**

Ka jawaabayaal badan ayaa xusay inaysan cadaynin Tixraaca Shuruudaha qabyada ah haddii ay tahay goobaha daryeelka aasaasiga ah iyo haddii kale — sida dhakhtarka guud, farmashiyaasha bulshada, dhakhtarka ilkaha iyo indhaha – in lagu soo daray Baaxada Weydiinta. Inkastoo oo ay tixgelinayso kuwaan in lagu daro ciwaanka mowduuca *'ka jawaabida caafimaadka iyo qeybta daryeelka UK oo dhan, oo ka mid ah...'*, Baroness Hallett **waxay oggolaatay tani in wax badan laga faa'iidi doono haddii lasii cadeeyo, waxayna ku talisaa ku darista qeybtaas:**

- ***doorka goobaha daryeelka aasaasiga ah sida dhakhtarka Guud;***

**Baarista shaqaalaha muruq maalka ee qeybta daryeelka bulshada**

Tixgelinta baarista shaqaalaha muruq maalka ayaa lagu daray Tixraaca shuruudaha qabyada ah ee loogu talagalay qeybta daryeelka caafimaadka, laakiin ma lagu darin tixraaca qeybta daryeelka. **Si loo hubiyo joogteynta, Baroness Hallett waxay ku talinaysaa ku beddelista qoraalka:**

> ***'maareynta cudurka safmarka ah ee guryaha dryeelka iyo goobaha kale ee daryeelka, waxaa ka mida ka hortagga iyo xakameynta caabuqa, u wareejinta guriyaha ama ka soo wareejinta guriyaha, daaweynta iyo daryeelka dadka deegaanka, xayiraadaha booqashada, baarista shaqaalaha muruq maalka iyo isbeddelada kormeerka;'***

## Istarajiyadda xiriirka dowaladda iyo doorka warbaahinta.

Mowduuca muhiimka ah ee laga helay jaawaabaha la tashadka waxay aheyd qaabka dowladda ay kula xiriirayso dadweynaha intii lagu jiray cudurka safmarka ah, iyo doorka warbaahainta, oo ay ku jirto baraha bulshada, doorka ay ka ciyaartay faafinta macluumaad saxa iyo kuwo khaladan intuba.

**Xiriirka fariimaha dowladda**

Jawaabaha la tashadka ayaa shaac-bixiyey su'aalaha ku saabsan qaabka go'aanada dowladda ay xiriirka ugu gudbisey dadweynaha. Ka jawaabayaasha ayaa weydiiyey Xog ururintu inay tixgeliso sida tirakoobka iyo xogta loogu isticmaali lahaa wararka koobaan we dowladda si loo sharxo go'aanada dowladda iyo sida uu wax ku oolnimada dhinacyada aan la hubin ee sayniska iyo halista loogu sheegey dadweynaha.

Ka jawaabayaal badan ayaa sidoo kale rabay in Xog ururintu tixgeliso isticmaalka dowladda ee hab dhaqanka sayniska iyo farsamooyinka 'xul ku riixa' ee fariimaha dadweynaha, ee leh fikrada ah inuu cudurka safmarka uu aad u saameyey caafimaadka dhimirka ee dadka iyada xog gudbinta ku salaysan cabsiida owgeed. Waxaa sidoo kale jiray dhowr tixraac ee jawaabaha dhexdooda oo ku aadan macluumadka khaldan iyo shirqoolada.

Kuwaani waa arrimaha aan u tixgelino in si hufan loogu daboolay Shruudaha Tixraaca qaybyada ah ee ciwaanka mowduuca *‘sida go'aamada loo gaaray, loo gudbiyey oo loo hirgeliyey*’. Sidaa darteed Baroness Hallett **ma ku talinayso wax ka beddelista Shuruduudaha Tixraaca si ey ugu turjunto arrintaas.**

Qaar badan oo ka mid ah ka jawaabahaa lala wadaagay Weydiintu inay waxey xooga saareen nidaamka tallaalka. Nidaamka tallaalka ee tixgelinta Weydiinta, waxaan tixgelin doonaa dhammaan dhinacyada bixinta tallaalka, oo ay ku jirto ficilcelinta degdega ah iyo waxyeelooyinka iyo sidoo kale diyaarinta magdhawga ku filan xaaladdahan oo kale.

Baroness Hallett **waxay ku talinaysa ka turjumista tixgelinta saameynta tallaalada iyada oo wax laga beddelayo Tixraaca Shuruudaha si ay uga turjunto:**

- ***kobaca, geynta iyo saameynta ee daaweynada iyo tallaada;***

## Doorka khuburada, la taliyaasha, sayniska iyo xogta ee sheegaya jawaabta cudurka safmarka ah ee Dowladda

Modwduuca muhiimka ah ee la tashadka wuxuu ahaa doorka khubarada iyo go'aan gaarista la taliyaasha Dowladda, iyo tayada xogta iyo cadeynta sayniska ee loo isticmaalay nidaamyaddan. Ka jawaabayaasha waxay xuseen gaar ahaan doorka Kooxda La talinta Sayniska ee Xaaladdaha Degdega ah (SAGE) iyo kooxaheeda yaryar, sida Kooxda Sayniska Hergabka Safmarka ah ee Influenza ee Qaabeynta(SPI-M), arrimaha soo baxaya sida:

- Sida Khuburada iyo ka taliyaasha loo doortay, ey kamid tahay baaxadda khibradda iyo deegaan asalka xubnaha;

- Tayada tallaabooyinka wargelinta cadeynta sayniska sida sharciga' labo mitiir' iyo 'sharciga lix';
- Sida inbta badan talada ay bixiso SAGE iyo kooxaheeda yaryar la isaga indho tiro.

Ka jawaabayaasha ayaa sidoo kale xusay muhiimada jawaabta cillmi baarista bulshada ee cudurka safmarka ah iyo gaar ahaan inta lagu jiro heerarka hore ee jawaabta.

Iyada oo tixgelinaysa arrimahaan la rabay in lagu soo daro Tixraaca Shuruudihii hore, Baroness Hallett **waxay soo jeedinaysa ku xoojinta luuqada Tixraaca Shuruudaha in lagu daro:**

- ***helista iyo isticmaalka xogta, cilmi baarista iyo cadeynta khuburada***

**Daah furnaan iyo heynta diiwaanka**

Intii lagu jiray nidaamka la tashiga waxaan dhageysanay walacyada ku saabsan sida ay loo diiwaangeliyay go'aamada ay dowladdu sameeysay, iyadoo ka jawaabayaasha ay waydiinayeen Xog ururintu inay baarto walacyada go'aamada wasaaraduhu ku sameeyeen iyada oo loo mariyay akoontiyada iimaylada gaarka ah iyo fariimaha WhatsApp, oona lagu diiwaangelinin diiwaan Waaxdeedka rasmiga ah.

Tixraaca Shuruudaha qabyada ah waxaa ku jira baaritaanka '*sida go'aamada loo sameeyey, loo gudbiyey oona loo hirgeliyey*'. Baroness Hallett **waxay oggolaatay in tani lagu waadixin karo iyadoo qoraalka lagu bedelaayo:**

- ***sida go'aamada loo sameeyey, loo gudbiyey, loo diiwaangeliyey loona hirgeliyey***

## Saameynta cudurka safmarka ah iyo jawaabtiisa ku aadan caafimaadka dhimirka iyo fayoqabka

Waxaan aad u dhagaysanay iyada oo la raacayo habka la tashadka ee ku saabsan saameynta uu ku yeeshay cudurka safmarka caafimaadka dhimirka. Qaar ka mid ah arrimaha lagu dulmaray wada tashiga ayaa kamid ahaa.

- **Tixgelinada caafimaadka dhimirk ee go'aan sameeynta** — tusaale ahaan, ilaa heerkee ayaa loo tixgeliyey inuu saameyn ku yeeshay caafimaadka dhimirka markii la soo rugay xayiraadaha, iyo ilaa intee ayaa la sameeyey si loogu taageero caafimaadka dhimirka ka hor xayiraadaha la soo rugay.

- **Kobaca dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka intii lagu jira cudurka safmarka ah** — tusaale ahaan, fahamka xadka walaca iyo kalinimada lala kulmay intii lagu jiray cudurka safmarka ah, iyo saameynta gaarka ah oo ay la kulmeen kooxaha sida dadka waaweyn, naafada iyo daryeel bixiyaasha.

- **Bixinta adeegyada caafimaadka dhimirka ee qorshayaasha soo kabashada** — tusaale ahaan, fahamka qorshayaasha wax looga qabanayo dib u dhaca adeegyada caafimaadka dhimirka ee loo baahan yahay.

Tixraaca Shuruudaha qabyada ah ma ku jiro tixraaca cad ee caafimadka dhimirka, in kastoo bixinta adeegyada caafimaadka dhimirka loo tixgelin karo '*cawaaqiibta cudurka safmarka ah ee bixinta xaaladdaha la xiriir baahiyaha aan aheyn-COVID*', iyo in arrinta caafimaadka dhimirka waxaa wax looga qaban karay mawduuca kooxo gaar ah oo dad, tani si cad uma muujin laheyn tixgelinta ballaran ee baarista caafimaadka dhimirka ee cudurka safmarka ah, taa oo aan si toos ah ula xriiirin bixinta adeegyada.

**Baroness Hallett waxay oggolaatay Tixraaca Shuruudaha inay si gaar ah loogu daro tixgelinta saameynta uu ku yeeshay cudurka safmarka ah caafimaadka dhimirka waxaa sidaa darteed ku talisaa in lagu daro wax ka beddelida:**

- ***saameynta uu ku yeeshay caafimaadka dhimirka ee dadka, oo ay ku jirto laakiin ay ka xadidnayn kuwa sida weyn uu wax yeeleeyey cudurka safmarka ah;***

## Kharashaadka dhaqaalaha ee cudurka safmarka ah iyo jawaabteeda, iyo doorka falanqaynta faa'iidada kharaska ee xayiraad iyo go'aamada kale ee xirista.

Mowduucii ugu dambeeyey oo la soo hadal qaaday intii lagu jiray la tashadka ayaa ahaa saameynta uu cudurka safmarka uu ku yeeshay dhaqaalaha, marka loo eego saameynta qeybaha gaarka ah ee dhaqaalaha, iyo xeerarka falanqaynta kharashaadka iyo faa'iidooyinka iyo xayiraadaha la soo rugey intii lagu jiray mudada ka jawaabista cudurka safmarka ah.

### Falanqeynta ku saleysan-qeybta

Iyada oo loo maraayo habka la tashadka waxaan dhagaysanay kooxaha ballaran ee kala duwan ee wakiilka ah qeybaha kala duwan ee dhaqaalaha, iyo sidoo kale ururada ganacsiyada ee matalaya shaqaalaha ku jira qeybahaas. Qaar ka mid ah ka jawaabayaashaas, ayaa in badan ah weydiiyey Waydiintu iney samayso falanqayn qotoda dheer' ee saameynta uu ku yeeshay cudurka safmarka ah ee qeybahooda,

iyo aqoonsiga sida soo kabashada qeybta ay ugu taageeri karto sida ugu wanaagsan.

Tusaale ahaan, ka jawaabayaasha ku jira qeybta soo dhawaynta ayaa la weydiyey inay tixgeliyaan saameynta ee ay ku yeeshay tallaabooyinka saameyna qeybtood gaar ahaan, sharciga, 'cuntada daruuriga ah' iyo gelida goobaha ay ku xiran tahay cadeynta heerarka tallaaka iyo dhanka qulqulka natiiijooyinka baarista. Sidoo kale, ka jawaabayaasha qeybta dalxiiska iyo safarka ayaa aad u rabay inay Weydiintu ay baarto saameynta ay ku yeelatay xayiraadaha la geliyey safarka caalamiga ah ee heerarka kala duwan ee cudurka safmarka. Waxaan sidoo kale maqalnay walacyada wax ku saabsan waayo aragnimada shaqaalaha waxaa loogu yeero ‘gig economy’ — tusaale ahaan, naafiyaasha, kuw baqshadaha qaada iyo darawalada cuntooyiinka geeya — iyadoo ka jawaabayaasha ay xuseen jagooyinka aan la isku hubin iyo shaqada sida dabiiciga ah u lacagta yar, iyada ay ku jirto mushaar la'aanta jirada, inta ay ka dhigan tahay shaqaalaha isku ara astaamaha COVID inaysan awoodi karin Is-karantiil. Saameynta uu ku yeeshay cudurka safmarka iskiis-u shaqaystaha ayaa sidoo kale la soo hadal qaday, gaar ahaan marka loo eego ilaa heerka taageerada dhaqaalaha.

Dhammaan qeybaha waxaaan maqlanay walacayada ku saabsan jadwalka iyo ku haboonaan hagida loo soo saaray ganacsiyada, iyo dhibaatooyinka ay sababtay hagida kala duwan ee u dhaxeya Dowladda UK, iyo Maamul Goboleedyadda iyo is maamulada deegaanka.

Weydiintu waxay rabtaa inay baarto arrimahaan, waxyeeladda kala duwan ee qeybaha oo dhan iyo sidoo kale wax ka qabashada ballaran ee ciwaankiisu yahay ‘*ciwaanka jawaabta cudurka safmarka ah ee dhaqaalaha*’. Waxay sidoo kale tixgelin doonaa waayo aragnimada shaqaalaha ee qeybaha kala duwan iyada loo tixgelinayo ‘*waayo araganimada iyo saameeynta ay ku yeelatay shaqaalaha qeybta daryelka iyo caafimadka, shaqaalaha kale ee muhiimka ah, intii lagu jiray cudurka safmarka ah*.’ Jawaabo badan oo qalbi taabaya ee mowduucan ayaa ogeysiin doonaa qaabka aan u naqashadayno iyo sida loo qabanayo baarista saameynta cudurka safmarka uu ku yeeshay dhaqaalaha.

In kastoo ay rumeysan tahay tixraacyada hadda ay oggolaan doonaan baarista arrimahaan, Baroness Hallett waxay oggolaatay in loo baahan yahay cadeyn weyn waxayna **ku talinaysa labo tallo oo dheeraad ah lagu daro Tixraaca Shuruudaha si loo hubiyo heerka safarka iyo dalxiiska, iyo iskiis u shaqeysta, ayaa si gaar ahaan loo tixgeliyey:**

- xiritaanka iyo dib u furida soo dhawaynta, tafaariiqda, ciyaaraha iyo nasashada iyo qeybaha safarka iyo dalxiiska, goobaha cibaadda, iyo machadyada dhaqanka;

- ***taageerayada ganacsiyadda, shaqooyinka iyo iskiis u shaqeystaha, oo ay ka mid tahay Qorshaha Shaqo Ku-negaanshaha ee Cudurka Fayraska Korona, Qorshaha Taageerada Dakhliga Iskiis- u shaqeystaha, nidaamka deymaha iyo xajmiyada ganacsiga kaalmada iyo Deeqadaha Dakhliga;***

**Doorka falanqaynta faa'idada-kharashka ee go'aan gaarista**

Ka jawaabayaal badan ayaa su'aal ka kenay haddii dowladdu ay si buuxda u bixinayso kharashaadka iyo faa'iidooyinka la xiriira cabirada lagu soo bandhigay heerka walba ee cudurka safmarka ah, sida caadi ahaan noqon laheyd haddey dhacdo marka la tixgelinayo xeerarka cusub ee dowladda.

In kasto tani inta badan lagu soo hadal qaaday xiriirkaa bandhiga wax ka qabashada aan aheyn farmashiga sida xanibaada, ka jawaabayaasha ayaa sidoo kale su'aal ka keenay haddii sidoo kale la qabanayo falanqaynta cabirista dhaqaalaha sida Qorshaha Shaqo Ku-negaanshaha ee Cudurka Fayraska Korona (nidaamka ‘fasaxa maqnansha’) iyo 'Ololaha Dibadda Ka cun si aad u Caawiso' (‘Eat Out to Help Out’)

Arrimahaan waxaa lagu tixgelin doonaa baaritaanadeena, waxaana lagu daboolay Shuruudaha Tixraaca qaybyada ah ee mowduuca ‘*sida go'aamada loo gaaray, loo gudbiyey oona loo hirgeliyey*’.

## Arrimaha kale ee la soo hadal qaaday intii lagu jiray la tashadka

Intaa waxaa u dheer mowduucyada muhiimka ah ee loogu aqoonsaday falanqaynta Alma Economics ee jawaabaha la tashadka, waxaa jiro dhowr arrimo oo kale oo la soo hadal qaday kuwaas oo tixgelin mudan sida ugu turjumanaanayaan Tixraaca Shuruudaha qabyada ah.

**Sinaan la'aanta**

Ka jawaabayaal badan ayaa soo jeediyay arrimaha la xiriira isirka, naafanimada iyo jinsiga in si gaar ah looga hadalo Shuruudaha Tixraaca, iyada oo loogu daray erayga hadda la xiriira ilaalinta dabeecadaha, si loo hubiyo arrimaha muhiimka ah ee saameynaaya kooxaha in aan la tagin. Waxaa sidoo kale la soo hadal qaaday walacyada ah in erayga hadda in lagu ilaalinayo dabeecadaha inay ka soo muuqanayso dhanka dhammaadka Tixraaca Shuruudaha, iyada oo aragtid ahaan u muuqanayso in dib looga fakaray.

Ka jawaabayaasha ayaa sidoo kale xusay in la tiraaco oo kaliya ilaalinta dabeecadaha, Weydiintu waxey halis galin kartay inay ku guuldareysato tixgeinta sinaan la'aanta oo aan ahayn dabeecaha uu sharcigu ilaaliyey, laakiin si kasta ahaatee waxaa la aaminsanahay inay tahay arrimo muhiim ah sida kooxaha kala

duwan uu u saameyey cudurka safmarka ah — tusaale ahaan, dakhliga iyo tayada gurigaynta.

Sidaa darteed Baroness Hallett **waxay ku talinaysa wax ka bedelista erayga ku saabsan dabeecadaha ilaalsan si looga dhigo ujeedada guud ee Xog ururintu, iyo si loo ballariyo diirad saariideed dhaafsan gaar ahaan dabeecadaha ilaalsan:**

- ***Qabashada shaqadeeda, Weydiintu waxay tixgelin doontaa farqiga u dhaxeya saameynta cudurka safmarka ah iyo qeybaha kala duwan ee dadka oo ay ku jiraan, laakiin aan ka xadidnayn, dabeecadaha, la ilaaliyay ee hoos yimaada Xeerka Sinaanta ee 2010 iyo qeybaha hoos yimaada Xeerka Sinaanta ee Northern Ireland 1998.***

Waxay sidoo kale soo jeedinaysa tani inay ka soo muuqato qeybta hore ee Tixraaca Shuruudaha, si ay ula socoto muhiimadeeda. Waxaan baari doonaa arrimaha la xiriiira sinaan la'aanta marka ay ku soo baxaan shaqadeena, waxaan tixgelin doonaa halka ay saameyntu ku weyn tahay xitaa dadka kala kulma sinaan la'aanta badan.

Waxaa sidoo kale naga go'aan inaan hubino inaan u qabno shaqadeena qaab ay helayaan dadka aan ka faa'iidaysan iyo kooxaha aan la matalin. Waxaan helnay jaawaaboku saabsan helitaanka Tixraaca Shuruudaha qaybyada ah iyo macluumaadka la tashadka ee aan ku daabacnay websaydkeena, waxaan isbeddel ku sameeyn doonaa qaab aan u xiririirno marka ay si raasmi ah u bilaabato Xog ururinta.  Tani waxaa dhici kartaa inay ku jirto turjumista warbixinada Weydiinta iyo dukumentiyada kale ee muhiimka ee luuqaddaha kale ee guud ee lagu hadlo, iyo in laga dhigo qaabab badan oo laga heli karo.

**Xuquuqaha aadanah iyo xoriyadda rayidka**

Mowduuca intii lagu jiro dhan habka la tashadka cudurka safmarka wuxuu saameyn ku yeeshay xuquuqda aadanaha iyo xoriyadda rayidka. Ka jawaabayaasha ayaa soo hadal qaaday arrimo kala duwan kuwaas oo loo arkayay inay saameyn ku yeelatay xuquuqaha lagu ilaaliyo xeerka Xuquuqaha Aadanaha ee Yurup; oo ay ku jirto:

- Haddii ka jawaabista cudurka safmarka ah ee dowladdau bilowday uu waafaqsanaa Qodobka 2 jawaabaadka ee ay dowladdu ku qaadayso tallaabooyinka ku haboon ka hortagga si loo ilaaliyo badqabka nolosha;

- Waajibaadka tallaalka ee leh qeybaha qaar, iyo shuruudaha loogu talagalay cadeynta tallaalka ee loogu talo galay safarka caalamiga ah.

- Isdhexgalka xiritaanka goobaha lagu cibaadaysto ee leh xuquuqda xoriyadda ee diinta;

- Saameynta ee ay ku yeelatay fulinta la xiriirta xayiradaha COVID- ee xoriyadda isku imaatiinka, gaar ahaan dibadd baxa;

- Xoriyatul qoolka, gaar ahaan qabashada iyo ka saarista qoraalada baraha bulshada, iyo caburinta laga dareemay saynisyahanadda kaas oo dhibaato ku ah aragtida la xiriirta xayiraadaha Covid.

Kuwa badan oo ka mid ah jawaabahan ayaa weydiiyey Weydiinta inay ku dabaqdo xuquuqaha aadanaha ee gaarka ah ee xooga saaraya baaritaankooda.

Baroness Hallett waxay fahamsan tahay walacyada laakiin ma rumeysna iney lagama maarmaan tahay wax ka beddelis dheeraad ah Tixraaca Shuruudaha ee arrintan la xiriira. Baaxadda iyo saameynta iyo xuquuq walba oo lagu dabi karo xuquuqaha aadanaha ayaa si buuxda loo baari doona maadama ay ku soo baxayaan shaqadeena, iyo marka loo eego miisaanka walaca ee arritan, waxay ku soo gunaanaday, qabashada shaqadeena, Waydiintu waxey la qabsan doontaa mabaa'diida 'GUDDIGA' ee ka Qeybgalista, Isla-xisaabtanka, Midab takoorka ka fogaanshaha, Xoojinta iyo Sharciga, sida loogu isticmaalay baaritaanada xuquuqaha aadanaha , in lagu hago Weydiinta.

**Covid mudada Dheer**

La tashadka jawaabaha ayaa soo hadal qaaday walacyada COVID mudada dheer (laakiin marka waxaa loogu yeera astaamaha COVID) inaysan ku filnaan doonin in loo tixgeliyo baaritaanada Xog ururinta.

Tixraaca Shuruudaha qabyada ah ayaa ku daboola qeybta caafimaad *'bixinta loogu talo galay' kuwa ey soo martay COVID mudada dheer'*. Waxaan baari doonaa ilaa heerka halisyada la xiriira COVID mudada dheerin loo tixgeliyey dhammaan qeybaha kale ee Shuruudaha Tixraaca — Tusaale ahaan, tixgelinta *'sida go'aamada loo gaaray, loo gudbiyey loona hirgeliyey'*ayaa lagu soo dari doonaa baarista sida COVID muudada dheer loogu tixgeliyey go'aamada hirgelinta tallaabooyinka xanibaada.

Sidaa darteed Baroness Hallett **ma ku talinayso in Tixraaca Shuruudaha ay u baahdaan wax ka beddelista dheeraad ah si loo hubiyo in COVID-ka mudada dheer si fiican wax looga qabtay.**

**Waayo -aragnimada reerka laga dhintay iyo duugta.**

Walacyada ku saabsan taageerada la siiyey qoyska laga dhintaay ayaa aad loo soo hadal qaaday intii lagu jiray la tashadka. Ka jawaabayaasha la weydiiyey in ay Xog ururintu baarto saameynta ay ku yeelatay xayiradaha caafimaadka dhimirka booqashada qarabada ku geeriyoonaysa isbitaalada iyo guryaha daryeelka, iyo xayiraadaha xaarista duugta gaar ahaan halkaas oo aan loogu qaban karin tacsiyadaha si aan u waafaqsanayn caadooyinka diimaha iyo dhaqanka. Ka jawaabyaasha ayaa sidoo kale xusay taageero la'aanta dhaqaale ee dadka laga dhintay iyo dib u sheegashada lagacahii gunadda ahaa ee marxuumka.

Baroness Hallett **waxay oggolaatay arrimahaan inay ka soo muudqaan Shuruuradaha Tixraaca qabayada ah, iyo tixraacyada dheeraadka ee noo oggolaanaya inaan wax ka qabano caafimaadka dhimirka, ee horey loo sheegay, inay na siin doonaan baaxadaas. Si kastaba ahaate, si loo hubiyo cadeynta weyn, waxay sidoo kale ku talinaysa ku darista:**

- **saameynta uu ku yeeshay caafimaadka dhimirka iyo fayo-qabka qoyska laga dhintay, oo ay ku jirto *taageerada tacsiyadda kadib***

Intaa waxaa u dheer awood badan iyo wareejinta jawaabaha laga helay dadka uu dilay cudurka safmarka ah, waxaan sidoo kale dhageysanay saameeynta ku yeeshay cudurka safmarka ah qeybta iyo duugta iyo qolka meydka, ka jawaabayaasha oo xusaya dhibaatooyinka ay sababtey waaxo badan ee dowladeed ee soo saaray hagida saameynaysa qeybta iyo nidaamka aan is waafaqsanayn ee u dhaxeya UK iyo maamuladda dowladdaha. Saameynta ay ku yeelatay shaqaalaha qeybta dhexdeeda ayaa sidoo kale la soo hadal qaaday — tusaale ahaan, dhibaatooyinka ay kala kulmeen helida tijaabada iyo PPE ama in loo aqoonsado 'shaqaalaha muhiimka ah'.

Baroness Hallett **waxay tixgelinaysa in si buuxda loogu daboolo saameynta ay ku yeelatay qeybta kaydka meydka iyo duugta iyo shaqaalaheeda Shuruudaha Tixraaca qabyada ah, sidaa darteed ma ku talin dooto wax ka beddelid dheeraad ah.**

**Goobaha cibaadda**

Waxaan ka dhageynaysa kooxaha diimaha wax ku saabsan xayiraadaha lagu dabaqay goobaha cibaaddaha iyo saameynta ee ku yeelatay taageerada bulshada, fulinta xafladaha nolosha sida guurka, duugta iyo qabashada munaasabadaha diimaha.

Ka jawaabista la tashadka sidoo kale ayaa ka hadashay walacyada ku saabsan isdhexgalka u dhaxeya xayiraadaha goobaha cibaadda iyo xuquuqaha xoriyadda diinta iyo xoriyadda isku imaatiinka ee xeerka Axdiga Xuquuqaha Aadanaha ee Yurup.

Sidaa darreed Baroness Hallett **waxay ku talinaysa in wax ka beddelista Txraaca Shuruudaha lagu soo daro:**

- ***xiritaanka iyo dib u furida soo dhawaynta, tafaariiqda, ciyaaraha iyo nasashada iyo qeybaha safarka iyo dalxiiska, goobaha cibaadda, iyo machadyada dhaqanka;***

**Fulintaa xayiraadaha bandowga**

Fulinta sharciyada iyo xeerarka la xiriira COVID- ayaa si joogto ah loo soo hadal qaaday intii lagu jiray geedi socodka la tashadka, iyo walacyada ku saabsan dhawaqa guud iyo saami jaawaabta booliska, iyo hababka kala duwan ee u dhaxeya ciidanka booliska. Booliska dibadd baxyadda iyo isku imaantiika dadweynaha iyo saameynta ay ku yeelatay xoriyaddaha rayidka iyo xuquuqaha aadanaha ayaa la soo jeediyey inay noqdan arrimaha ah in lagu baaro Weydiinta.

Ururada ayaa sidoo kale weydiyey Weydiinta inay tixgeliso haddii bulshooyinka BAME uu si xun u saameyey ka jawaabida booliska — tusaale ahaan, haddii laga yaabo inay heleen ganaax weyn iyo halkii ay ka heli lahayeen digniin, oo ay soo sheegeen isticmaalka awoodaha ‘istaag oo baar’ intii lagu jiray mudada xanibaadda.

Tixraaca Shuruudaha qabayada ayaa ka mid ah baarista ‘*sharciga iyo xeerka xakameynta*’. Iyada oo mar walba la rajeynayo in lagu daro tixgelinta qaabka sharciga la xiriira Covid iyo xeerarka loo dhaqangeliyay, Baroness Hallett **waxay oggolaatay inay tani u noqon karto muhiim in lagu saxo wax ku beddelida qoraalka:**

- ***sharci dejinta iyo xeerka xakameynta, iyo fulinta***

**Xadgudub qoyska**

Tixraaca Shuruudaha qabyada ah si gaar ah uma sheegin saameynta xayiraadaha bandowga ay ku yeeshaan xadgudub qoyska. Waxaan ka maqalnay ururada la shaqeeya dhibanaayasha xadgudub qoyska sida joogtada ah iyo xadgudubka qoyska ee darran intuba inay korortay intii lagu jiray cudurka safmarka ah, gaar ahaan intii lagu jiray muddooyinkii xanibaaddaha.

Waxaan sidoo kale maqalnay dabciga xayiraadaha bandowga iney ku adkaysay dhibanayaasha xadgudubka qoyska inay ka helaan taageero haya'adaha iyo bulshooyinka, iyo kuwa aan helin taageeraa dhaqaale aan ku filnayn si ay u

daboolaan rabitaanada adeegyada kadib marka u dhammaado xayiraadaha bandowga.

Baroness Hallett **waxay oggolaatay saameynta uu ku yeeshay Xayiraadaha bandowga xadgudubka qoyska in lagu tixgeliyo Tixraaca Shuruudaha, waxayna ku talisay in lagu soo daro wax ka beddelida:**

- ***ilaalinta badqabka iyo taageerada dhibanayaasha xadgudubka qoyska***

**Doorka dowladda hoose iyo eray bixinta iyo qeybta bulshada**

Ka jawaabayaasha la tashadka ayaa dareemay go'aan gaarista iyo keenista adeegyada ee dowladdaha hoose ay bixiyaan inay ku filnayn aqoonsiga Tixraaca Shuruudaha qabyada ah — gaar ahaan markii loo siiyo doorka hogaanka meelaha sida dadka waaweyn iyo daryeelka bulshada ee carrurta. Waxaan sidoo kale maqlanay humaagyada wanaagsan ee waxtarka isku xirka u dhaxeya Dowladda UK iyo maamulada hoose — tusaale ahaan, wax ka qabashada guri la'aanta iyo hurdo xumida intii lagu jiray cudurka safmarka ah — laakiin sidoo kale walacyada ku saabsan xeerarka ay 'soo rogeen' maamulada dowladdaha hoose

Ka jawaabayaal badan ee la tashadka ayaa xusay qeybta bulshada iyo haya'adaha samaflka iyo ururada sama falka ah inay kaalin weyn ka qaateen ka jawaabista cudurka safkmarka ah, oo ay ku jirto qabanqaabadda mutadawaciinta iyo dhisida kalsooniyada bulshooyinka la takooro si ay uga caawiyaan dowladda inay siiso mudnaanta sida bixinta tallaalka. Walacyo ayaa la soo hadal qaaday, si kastaba ahaatee, waxay ku saabsan yihiin joogteynta iyo jadwaladda qeybta ku lugta leh qorshaynta iyo go'aan gaarista, xadka iyo jawladda taageerada dhaqaalaha ee qeybta.

Baroness Hallett **oggolaaday doorarka dowladda hoose iyo mutadawaciinta iyo qeybta bulshada inay si badan ugu turjumaan baaxda Tixraaca Shuruudaha, waxaana ku talinaysa ku darista (qeybta koowaad, ee go'aan gaarista):**

- ***wada shaqaynta u dhaxeysa dowladda dhexe, maamul goboleeyadda, gobolka iyo dowladdaha hoose iyo qeybta bulshada iyo iskaa wax u qabso;***

**Iyo, qeybta ka jawaabista dhaqaalaha:**

- ***dhaqaalaha dheeraadka ah ee loogu talo galay iskaa wax u qabso iyo qeybta bulshada***

***Isbeddelada kale***

***Baroness Hallett waxay ku talinaysa dhowr isbeddel oo kale. Go'aankeeda wuxuu kordhiyaya maqaamka iyo muuqa xoog saarideeda sinaan la'aanta iyadada oo kor loo dhaqaajinayo ujeedada hogaanka Warsashadeedu si loo sameeyo dhammaan tixgelinyada kale ee ku shaqaynaya shaqada Weydiinta. Sidaa darteed waxay ku talinaysa sheegida tixgelinada oo dhan taas oo ku shaqaynaysa shaqada Weydiinta ka hore ee labada ujeedo ee Weydiinta. Ugu dambayntii, waxay ku talinaysa dhowr isbeddelo oo yar qaabaysan.***

## Su'aasha 2: Arrimahee ama mowduucyadee ayay Weydiintu fiirin doontaa marka ugu horeyso?

Mowduucyada inta badan ay xoogaa ka sareen ka jawaabayasha la tashadka oo ey rabeen iney Waydiintu baaraan marka hore waxey ahaayeen:

- Saameynta cudurka safmarka ah ee carruurta iyo dadka dhalinyarada ah
- Maareynta ka jawaabida qeybaha daryeelka bulshada iyo caafimaadka.
- Isticmaalka wax ka qabashada aan aheyn farmashiga sida xayiraadda
- Doorka khubarada iyo la taliyaasha iyo isticmaalka xogta iyo sayniska, ee go'aamada Dowladda

Iyada oo aysan aheyn layaab, waxaa jirtay inay dadku mudnaan siiyaan meelaha gaar ahaan ay ka walacsan yihiin, qorshaynta iyo tixgelinta qaabka aan u qaban doono Weydiintu, fikradaha la baxsho ayaa ka caawin doonaa qaabaynta qaabka aan u tixgelin doono arrimaha. In kastoo go'aan gaarista degdeg ah ee taxida ah saxda ah ee baaristeena ka hor go'aanka kamabaysta ah ee Ra'iisal Wasaraha ee Shuruudaha Tixraaca, waxaan isku dayaynaa inaan samayno faafaahin dheeraad ah oo ku saabsab qaabka aan u rabno inaan u qabano Xog ururinta xagaaga. Waxaan bixin doonaa warbixino joogto ah.

## Su'aasha 3: Xog ururintu miyey dejin doontaa taariikhda u qorshaysan in lagu soo dhammeyo dhageysiyeeda dadweynaha?

Ka jawaabayaasha la tashadka ayaa si xoogaan u taaageray udejinta Waydiintu dhammadka taariikhda ee loogu talo galalay dhageysigeeda.

Iyada oo looga hadlay su'aashan munaasabadaha la tashiga, ka jawaabayaasha ayaa aqoonsiga xiisada dhaxalka ee u dhaxeysa baarista Weydiintua ee dhinac walba ee baarista cilmiyeysan cudurka safmarka ah, iyo Xog ururinta awoodda u leh inay natiijada ku sameeyso waqtiga ku haboon. Isku dhalitirka, ka jawaabayaasha ayaa doortay dejinta Weydiintu jadwalka baaxda cad iyo jadwalka adag ee loo qorsheyey. Ka jawaabayaasha ayaa soo dhaweyey ka go'aanta Tixraaca Shuruudaha qabyada ah ee loogu talagalay warbixinta ku meel gaar ah ee arrinta Weydiinta inta ay socoto, si ay uga caawiso tallooyinka lagu aqoonsaday iyo wax ka qabashada sida ugu dhaqsiyaha badan.

Si kastaba ahaate, sida aan bilowgii warbixintan aan ku xusnay wax walba oo yihiin Shuruudaha Tixraaca ee Kamadabaysta ah, baaxada arrimaha ay Waydiintu u baahan doonto iney qadariso waa mid ballaaran, waxaana hubaal ah inay jiri doonaan arrimo aan la saadaalin karin inay ka soo baxaan qabashada baaritaanka.

Waxaan sidoo kale si weyn ugu tiirsanan doonaan marqaatiyadda nagu siinaya cadeynta waqti iyo qaab diyaarsan. Qoddobaddan ayaa kusii kordhinaya dhibaatadda in dadka weynaha lagu dhageysto waqtii loogu talo galay dibna, u dhiga natiijooyinka iyo warbixinta.

Waxaan rabnaa inaan bixino macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaabka loo qaban dooono Weydiinta, oo ay ku jirto sida aan wax ugu qabanayno taariikhda la soo jeediyey in lagu dhageysto dadweynaha, xagaaga iyadoo laga soo qaadayo in Tixraaca Shuruudaha kama dambeysta ah la bixiyey.

## Su'aasha 4: Sidee loo naqshadeynaya Weydiintu oo na looga shaqeynaya in loo hubiyo dadka laga dhintay ama kuwa ay waxyeelada soo gaartay ama dhibaatada uu sababay cudurka safmarka ah in la maqlo codadkooda?

Waxaan maqalnay sadex modwuuc ee ugu muhiimsan ee jawaab u ah su'aashan.

- **Hubinta in la ururiyay xogta iyo ka qeybqashada dadwaynaha cadadka kooxda ballaran inta ay surtagalka tahay** — ka jawaabayaasha ayaa rabay inay Waydiintu isticmaasho qabab kala duwan si loo xaqiijiyo ka qeygalista ballaran, sida furida madasha wada hadalada, su'aalo qoraaleedka iyo xog ururinta online-ka. Ka jawaabayaasha ayaa sidoo kale soo hadal qaaday muhiimada dhageysiga dadka UK oo dhan, iyada oo si toos ah ugu imaanayso shaqaalaha la shaqeeyey qoysaska laga dhintay, sida shaqaalaha NHS iyo agaasimayaasha duugta.

- **In xooga la saarayo dhegeysiga kuwa la kulmay saameynta kala duwan, oo dheeri ku ah dadka laga dhintay** — ka jawaabayaasha ayaa xusay cudurka safmarka ah inuu saameyey qof walba, Xog ururintanu ay hubiso dhageysiga saameynta ballaran ee kooxaha, oo ay ku jiraan laakiin aan ka xadidnanyn carruurta, naafadada iyo dadka ku wayay ganacsigooda.

- **Bixinta wadooyinka kala duwan ee loo dhan yahay taas oo loo marayo waayo araganimada dadka in lagu soo dari karo** — ka jawaabayaasha ayaa aad u rabay Xog ururinta ay qabato dareen shaqsiyeed goobta rasmigeeda ama sharcigeeda liita marka loo fiiriyo dhegeysi waydiimo dadwayne ee caadi ah. Jawaabaha ayaa sidoo kale aqoonsaday muhiimada ay u leedahay Warsashadu inay helaan dad kala duwan iyo baahida wax looga qabanayo caqabadaha ee guud ka qeybgalista sida kharashaadka daryeelka carruurta.

Waxaan aqoonsanay in ay dad badan aysan rabin inay ka qeybgalaan habka dhageysiga dadweynaha rasmiga ah ee Weydiinta, laakiin si kasta ahaate waxaan rabaa inaan hubino codadkooda in la maqlo. Waxaaa naga go'aan inaan wadno layliga gaarisiinta-ballaran taas oo dhageysan doonta khibradaha dadka kuwaas oo dhibaato soo gaartay intii lagu jiray cudurka safmarka ah. Tani ma ka mid ahan oo kaliya qoysaska laga dhintay, laakiin sidoo kale kooxaha kale ee dhibaatada ay ku dhacday, sida ardayda, milkiiliyaasha ganacsiga, iyo dadka ay u seegtay daaweynta xaaladdo aan aheyn-Covid. Waxaan dhagaysan doonaa dadka UK oo dhan, waxaan ka dhigi doonaa shaqada layliga dhagaysiga inay heli karaan kooxaha dan yarta ah.

Waxaan ku jirnaa heerka hore qorshaynta shaqada waxayna ku lug yeelaan doontaa dadka uu saameyey cudurka safmarka ah ee ku jira naqshadeena xagaaga.

## Maxaa xigga oo dhaca?

Baroness Hallett waxay warqad u qortay Ra'iisal Wasaraha iyada oo kula talisay isbeddelada Tixraaca Shuruudaha ee lagu dejiyay dukumentigan. Sida uu kafaalaqaaday wasiirka Weydiintan, waxayna noqon doonta inuu Ra'iisal Wasaraha u go'aamiyo Tixraaca Shuruudaha kama dambaysta ah. Baroness Hallett waxay weydiisay Ra'iisal Wasaraha inuu tixngeliyo isbeddeladeeda iyo inuu uga jawaabo sida ugu dhasiyada, marka si rasmi ah ayay ugu bilaaban karta shaqadeena.

Sida aan ku sheegnay bilowga warbixintaan, Tixraaca Shuruudaha ayaa qeexi doonaa baaxada ballaran ee Warasashadu, laakiin waxay dejinasysa aasaaska hoose waxayna dejinaysa arrimaha taxanaha ah taas oo lagu baari doono faafahinta cilmeyeysan. Arrimaha la aqoonsaday, iyo qaabka iyo nidaamka lagu baaray, ayaa la dejin doona marka ay si rasmi ah u bilaabanayso Weydiintu. Waxaan rajanaynaa tani ay noqoto sida ugu dhaqsiyaha badan.

Dowladda Scotlanda ayaa sidoo kale sameeyey warsasho gaar ah si loo baaro ka jawaabista cudurka safmarka ah ee Scotland. Marka ay labada warsan ay bilaabaan shaqadooda, labaduba waxaa ka go'aan inay yareeyo inay isku eekaadan labada baaris, cadeynta la soo ururiyay iyo warbixinta. Markii loo eego ka jawaabista adag ee cudurka safmarka ah, hubaashii waxaa jiri doonta waxa isku milan oo uu dhaxeya jawaabaha ka soo baxa Dowladda Scottland iyo kuwa loo boos celiyey Dowladda UK waxaana mararka qaar jiri doonto inay Dowladda UK ay u baahto inay tixgeliso qaar ka mid ah arrimaha Weydiinta Scottland, xitaa haddii ay yihiin arrimo lagu wareejiyey. Ujeedadeenu waa inaan si wada jir ah ugu shaqayano sida ay isugu xigxigaan tixgelinta arrimahan.

Marka ay bilaabto Weydiinta UK, waxaa jiri doonto in xooga la tixgeliyo isku diyaarinta in shaqada la qabto ka hor inta aysan dhicin dhageysiga dadweynaha ee la tabaan karo, oo ay ku jirto aqoonsiga marqaatiyaasha muhiimka, xudunta ka qeybgalista, codsashada iyo dib u qiimeynta cadeynta weyn ee cilmi baarista guddiga khubarada iyo in la taliyaasha ay bixiyaan Warsasho leh takhasuse iyo cadeynta farsamo iyo isha iyo u diyaargarowga xarumaha dhageysiga dadweynaha ee UK. Heerkaan, iyada oon la garanaynin macluumaadka Tixraaca Shuruudaha, way adagtahay in la soo kobo wax saxda ah ku lugta leh iyo inta ay qaadan doonto. Si kastaba ahaatee, Baroness Hallett waxay rabtaa inay sameeyso bayaanka furista sida ugu dhaqsiyaha badan kadib marka uu Ra'iisal Wasaraha uu soo saaro Tixraaca Shuruudaha kamadabaysta ah. Waxay dejin doontaa faafaahinta dheeraadka ah sida loo qabanayo shaqadeena iyo guud ahaan qaabka baaristeena, oo ay ku jirto waxa ugu horeeyo aan eegi doono.

# Dheeraad: Tixraaca Shuruudaha ee lagu Taliyay

Weydiinta COVID-19 UK
TIXRAACA SHURUUDAHA QABYADA AH – MAAJO 2022

Weydiintu waxay baari doonaa, tixgelinta iyo diyaarinta warbixinta iyo ka jawaabista cudurka safmarka ah England, Wales, Scotland iyo Northern Ireland, ilaa iyo inta loogu soo daray taariikhda dejinta rasmiga ah ee Weydiinta, xx xxxx 2022.

Qabashada shaqadeeda, Weydiintu waxay:

a) tigelin doontaa boos celinta iyo arrimaha ku wareeinta Boqortooyada Ingiriiska oo dhan, inta lagama marmaanku ay tahay, laakiin waxay u baahan doontaa in la yareeo isku eekaashaha baarista; soo ururinta cadeynta iyo warbixinta ee leh wixi ah Weydiinta dadweynaha ee kale ee uu sameeyey maamulka xil wareejinta;
b) waxay tixgelin doontaa farqiga u dhaxeya saameynta cudurka safmarka ah iyo qeybaha kala duwan ee dadka oo ay ku jiraan, laakiin aan ka xadidnayn, dabeecadaha la ilaaliyay ee hoos yimaada Xeerka Sinaanta ee 2010 iyo qeybaha hoos yimaada Xeerka Sinaanta ee Northern Ireland 1998.
c) dhagaysiga iyo in si taxad buuxda loo tixgeliyo waayo araganimada qoysaska laga dhintay iyo kuwa kale ay dhibaatadu ku dhacday ama ku qasaaray cudurka safmarka ah awgiis. In kastoo Weydiinta u ay tixgelin doonin faafaahinta kiisaska shaqsiga ah ee waxyeelada ama dhimashada, dhagaysiga dhacdooyinkaan waxay ogeysiinayaan fahamka saameynta cudurka safmarka ah iyo jawaabta, iyo casharada laga baranaayo;
d) dul maray halka lagu aqoonsaday casharada diyaargarowga iyo ka jawaabista cudurka safmarka ah loogu dabaqi karo xaaladdaha degdeg ah ee rayidka;
e) ee leh tigelinta surtogalka ah ee isbarbarhdiga caalamiga ah; iyo
f) soo saarida warbixnadeenda (oo ay ku jiraan warbixinta ku meel gaarka ah) iyo talooyiinka ku haboon waqtiga.

Ujeedada Weydiintu waa:

1. **Baarista ka jawaabis COVID-19 iyo saameynta uu ku yeeshay cudurka safmarka ah England, Wales, Scotland iyo Northern Ireland, iyo soo saarista xisaabta sheekadada dahbtaa ah, oo ay ku jirto:**

a) Jawaabta caafimaadka dadweynaha ee UK oo dhan; oo ay ku jirto:
   i) diyaargawoga iyo adkaysiga;
   ii) sida go'aamada loo sameeyey, loo xiiriiray, la diiwaangeliyey loo hirgeliyey;
   iii) go'aan gaarista dowlad goboleedyada;
   iv) wada shaqaynta u dhaxeysa dowladda dhexe, maamul goboleeyadda, gobolka iyo dowladdaha hoose iyo qeybta bulshada iyo iskaa wax u qabso;
   v) helista iyo isticmaalka xogta, cilmi baarista iyo cadeynta khuburada;
   vi) sharci dejinta iyo xeerka xakameynta iyo, fulinta;
   vii) Gaashanka iyo ilaalita caafimaad ahaan u nugul;
   viii) isticmaalka xayiraadaha iyo wax ka qabashada aan aheyn farmashigha sida Kala-fogaanshaha bulshada iyo isticmaalka weji xirada;
   ix) baarista iyo tixraaca tabashada iyo karantiilka;
   x) saameynta uu ku yeeshay caafimaadka dhimirka iyo fayo qabka ee dadka, oo ay ku jirto laakiin ay ka xadidnayn kuwa sida weyn uu wax yeeleeyey cudurka safmarka;

xi) saameynta uu ku yeeshay caafimaadka dhimirka iyo fayo-qabka qoyska laga dhintay, oo ay ku jirto taageerada tacsiyadda kadib;
xii) Saameynta ey ku yeelatay caafimaadka iyo qeybta shaqaalaha daryeelka iyo shaqaalaha kale ee muhiimka ah;
xiii) saameynta ay ku yeelatay carruurta iyo dadka dhalinyarada ah, oo ay ku jirto caafimaadka, fayo-qabka iyo daryeelka bulshada;
xiv) waxbarashada iyo bixinta sanadaha hore;
xv) xiritaanka iyo dib u furida soo dhawaynta, tafaariiqda, ciyaaraha iyo nasashada iyo qeybaha safarka iyo dalxiiska, goobaha cibaadda, iyo machadyada dhaqanka;
xvi) guriyenta iyo guri la'aanta;
xvii) ilaalinta badqabka iyo taageerada dhibanayaasha xadgudubka qoyska;
xviii) xabsiga iyo goobaha kale ee dadka lagu hayo;
xix) nidaamka cadaaladda;
xx) safarka iyo xuduuaha; iyo
xxi) ilaalinta badqabka lacagha dadweynaha iyo maareynta halista dhaqaalaha.

b) Jawaaba caafimaadka iyo qeyba daryeelka ee UK oo dhan, oo ay ku jirto:
i) Diyaargarowga iyo awoodda hore iyo kartida lagu kordhinayo awoodda iyo adkaysiga;
ii) lambarka hore ee leh adeegyada tallada ee daryeelka caafimaadka rasniga sida 111 iyo 999;
iii) doorka goobaha daryeelka aasaasiga ah sida dhakhtarka Guud;
iv) ku maareynta cudurka safmarka ah ee guryaha daryeelka iyo goobaha kale ee daryeelka, oo ey ku jirto hortagga caabuqa iyo xakameynta, xaaladda degdeg ah, awooda daryeelka muhiimka ah, bixinta bukaanada, isticmaal 'Ha isku dayin go'aanada wadno ka riixida wadnaha bukaanka si soo noqdo wadnaha (DNACPR), qaabka daryeelka caafimaadka, baarista shaqaalaha muruq maalka, isbeddelida kormeerista iyo saameynta uu ku yeesha shaqaalaha iyo heerarka shaqaalaysiinta;
v) ku maareynta cudurka safmarka ah ee guryaha dryeelka iyo goobaha kale ee daryeelka, waxaa ka mid ka hortagga iyo xakameynta caabuqa, u wareejinta guryaha ama ka soo wareejinta guriyaha, daaweynta iyo daryeelka dadka deegaanka, Xayiraadaha booqashada, baarista shaqaalaha muruq maalka iyo isbeddelada kormeerka;
vi) Daryeelka guriga, oo ay ku jirto xanaaneyaasha aan la siinin lacagta.
vii) daryeelka dhalmada ka hor iyo kadib;
viii) soo gadista iyo qeybinta qalabka muhiimka ah iyo sahayda, oo ay ku jirto PPE iyo qalabka wada qaada;
ix) kobaca, dhalmada iyo saameynta ee daaweynada iyo tallaada;
x) Cawaaqiibta cudurka safmarka ee bixinta xaaladdaha aan la xiriirin COVID iyo baahiyaha; iyo
xi) bixinta kuwa la kulma waayo aragnimada COVID mudada dheer.

c) Jawaabta dhaqaalaha ee cudurka safmrka ah iyo saameyntiisa, waxaa ka mid ah qaabka ay dowladdu ay wax ugu qabanayso:
i) taageeraa ganacsiyadda, shaqooyinka iyo iskiis u shaqeystaha, oo ay ka mid tahay Qorshaha Shaqo Ku-negaanshaha ee Cudurka Fayraska Korona, Qorshaha Taageerada Dakhliga Iskiis- u shaqeystaha, nidaamyada deymaha iyo xajmiyada ganacsiga kaalmada iyo deeqadaha lacagta;
ii) lacagaha dheeraad ah ee khuseeya adeegyada dadweynaha;
iii) dhaqaalaha dheeraadka ah ee loogu talo galay iskaa wax u qabso iyo qeybta bulshada; iyo

iv) faa'iidooyinka mushaarka jirada iyo taageerada loogu talagalay dadka nugul.

**2. Aqoonso casharada laga baranayo kuwa kor ku xusan, si loo ogeysiiyo diyaargarowga UK cudurada safmarka ah mustaqbalka.**